



Fariintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Luulyo 22, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ilaha loogu talagalay kulaylka xad dhaafka ah

Sida laga soo xigtay Waaxda Adeega Cimilada Qaranka, qaybo badan oo ka mid ah Oregon ayaa la filayaa in ay la kulmaan kulayl xad dhaafka ah laga bilaabo Isniinta, Luulyo 25, isaga oo soconaya ilaa toddobaadka. Heerkulka sare ayaa la filayaa in uu gaaro heerar halis ah, oo ay ku jiraan mid gaaraya ilaa 105 qaybo ka tirsan koonfurta, bartamaha iyo bariga Oregon, iyo 100 oo ah degaanka Portland iyo Willamette Valley.

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ayaa doonaya in uu xaqiijiyo in dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo qoysaskoodu ay badbaado qabaan inta lagu jiro waqtigani. Hay'adaha maamullka kiiska (CME) iyo daryeel bixiyayaashu waa in hubiyaan shakhsiyaadka ka tirsan adeegyadan oo xaqiijiyaan in ay dadku badbaado iyo kalsooni qabaan, haddii kale, ka caawiyaan qofka in uu gaaro xarun la isku qaboojiyo ama goob kale iyadoo la raacayo qorshayaashaada xaalada degdega ah.

CME-yadu waa in ay raacaan qorshayaashooda xaalada degdega ah ee la xiriira kuleylka iyo korontada la'aanta imaan karta. CME waa in ay sidoo xiriir la sameeyaan xarumaha hawlgalada xaalada degdega ah ee degaanka haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Macluumaadka la iskala soo xiriirayo oo loogu talagalay xarunta xaalada degdega ah ee degaanka waxaa laga helayaa [internet-ka](#).

Shaqaalaha taageerada shakhsiyeed waxay dadka u qaadi karaan xarumaha la isku qaboojiyo oo la joogi karaan iyaga inta ay socoto hawshu, haddii loo baahdo. Tani waxay ka dhignaan kartaa koror ku meel gaar ah oo ku

yimaada saacadaha iyo masaafada la socdo. Labadooduba hore ayaa laga sii oggolaaday waxaana lagu oggolaan karaa email ahaan. Email u dir kooxda Dib u eegista Dhaqaalaha ee ODDS [odds.fundingreview@odhsoha.oregon.gov](mailto:odds.fundingreview@odhsoha.oregon.gov) haddii saacadahu dhaafsiisan yihiin waxa ay ansixin karto CME.

Ilaha kale waxaa ka mid ah:

- [Ka hortaga Jirooyinka La xiriira Kulaylka \(OHA\)](#)
- [Kulaylka Xad dhaafka ah \(CDC\)](#)
- [Calaamadaha iyo Astaamaha Jirada La xiriirta Kulaylka \(CDC\)](#)
- [211 waxyaabo loogu talagalay helitaanka xarumaha la isku qaboojiyo ee degaanka](#)

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).